

XUQUUQAHA SHAQAALAHA SIDA WAAFAQSAN XEERKA SHAQOORYINKA, MUSHAHARKA KU JAANGO'AN NOLOL MAALMEEDKA, & KAN CAADIGA AH EE MAGAALADA BOSTON

Xeerka Shaqooyinka, Mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka, & Kan caadiga ah ee Magaalada Boston ayaa damaanad qaada shaqaalaha buuxiya shuruudaha ee ganacsiyada qandaraaska kula jira Magaalada Boston kana shaqeeya adeegga qandaraasyada, qandaraas hoosaadka, ama qandaraasyada adeegga dhismaha ee kasbada mushahar saacadle ah oo cayiman.

MACLUUMAADKA KU SAABSAN MUSHAHARKA KU JAANGO'AN NOLOL MAALMEEDKA - HADDA WAA \$18.78

Dhammaan shaqaalaha shaqadoodu tahay qandaraas hoosaadyada iyo qandaraasyada adeegga Magaalada Boston ee u dhigma kharash ku kaca ugu yaraan \$25,000 waa in la siyaa mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka. Mushaharkan waxbaa laga beddelaa sannad kasta bisha Luuliyo. Laga bilaabo 1-da Luulyo, 2025, mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka waa **\$18.78**. Tani waxay la micna tahay shaqa-bixiyaasha hadda waxaa looga baahanyahay inay siyaan shaqaalohooda mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka oo gaaraya ugu yaraan **\$18.78** saacadiiba.

MACLUUMAADKA KU SAABSAN MUSHAHARKA/MAGDHOWGA CAADIGA AH

Dhammaan shaqaalaha nadaafadda iyo ilaalada ka shaqeeya qandaraasyada dhismaha ee Magaalada Boston ama qandaraasyo hoosaadka ama ka shaqeeya dhisme cayiman oo ay Magaaladu leedahay ama u kireysan waa in la siiyaa magdhow caadi ah iyadoo la isticmaalayo jadwalka mushaharka caadiga ah. Waaxda Xeerarka Shaqada (Department of Labor Standards, DLS) waxay soo saartaa jadwalka mushaharka caadiga ah ee dhammaan mashaariicda bixiya mushahar caadi ah. Shaqaalaha Adeegyada Dhismaha ee lagu damaanad qaado xeerka ayaa ka codsan kara shaqa-bixiyahooda koobiga jadwalka mushaharka; jadwalka mushaharka waxbaa laga beddelaa sanad walba.

Si aad u habsato haddii uu ku damaanad qaado Xeerka Shaqooyinka, Mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka, & Kan caadiga ah ee Magaalada Boston, ka wac lambarka 617-918-5236 Xafiiska Xogdhawrka Shaqaalaha iyo U hoggaansanaanta Shaqada.

GUDBI CABASHO

Shaqaalaha uu xeerka damaanad qaado waxay cabasho u gudbin karaan Xafiiska Xogdhawrka Shaqaalaha iyo U hoggaansanaanta Shaqada haddii shaqa-bixiyahood uusan u hoggaansamin shuruudaha Xeerka Shaqooyinka, Mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka, & Kan caadiga ah ee Magaalada Boston. Cabashooyinka Shaqaalaha ku aadan eed xadgudub waxaa lasoo gudbin karaa xili kasta waxayna ahaan donaan kuwa qarsoodi ah oo aan cid kale lala wadaageynin.

Si aad u gudbiso cabasho, wac 617-918-5236 ama booqo boston.gov/living-wage.

TAKOORKA IYO AARGOOSIGA KA DHANKA AH EE SHAQAALAHA SHARCIGA UU DAMAANAD QAADO

Waa sharci darro shaqa-bixiye inuu shaqada ka ceyriyo, mushaharka ka dhimo, ama uu takooro Shaqaalaha uu Sharciga Damaanad qaaday sababo la xiriiro gudbinta cabasho mise inay adeegsadaan xuquuqdooda sida waafaqsan Xeerka Shaqooyinka, Mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka, & Kan caadiga ah ee Magaalada Boston. Shaqa-bixiye kasta oo arrinkan sameeya waxaa loo tixgelin donaa inuu jebiyey xeerka oo waxaa baari doona Xafiiska Xogdhawrka Shaqaalaha iyo U-hoggaansanaanta Shaqada.

GANAAXYADA

Haddii Xafiiska Xogdhawrka Shaqaalaha iyo U-hoggaansanaanta Shaqada uu habsado in shaqa-bixiye uu jabiyay Xeerka, ganaaxyada soo socda ayaa lagu xugmin karaa:

- Qanaaxyo lacageed oo gaaraya \$300 shaqaale kasta oo lagu damaanad qaado mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka maalin kasta ganacsiga damaanada leh uu ku xadgudbaayo xeerkan;
- Inuu cabasho u gudbiyo gobolka/dawladda federaalka ee ay arrintaan khuseyso;
- Inuu magdhow mushahar uu siyo shaqaale kasta ee ay saamaysey arrinta;
- In laga joojiyo bixinta lacagaha qandaraasyada iyo qandaraas hoosaadyada ee hadda socda;
- In uu san u qalmin qandaraasyada ay bixiso Magaalaada muddo dhan seddax sanno ama ilaa dhammaan ganaaxyada iyo magdhobada si dhameystiran loo bixiyo; iyo
- Tilaabo kasto oo loo arko inay munaasab tahay iyadoo lagu takrifalaayo go'aanka iyo awooda Magaalada.

Su'aalaha mise walwalada ku saabsan Xeerka Shaqooyinka, Mushaharka ku jaango'an nolol maalmeedka, & Kan caadiga ah ee Magaalada Boston waa in loo diro Xafiiska Xogdhawrka Shaqaalaha iyo U-hoggaansanaanta Shaqada:

43 Hawkins Street, Boston, MA 02114
workers@boston.gov
617-918-5236



Si aad wax badan u ogaato, booqo boston.gov/labor-policy ama iskaan ka qaad QR koodhka.

This notice contains information about your rights or obligations, and should be translated immediately. Translations are available at no cost. To request translation services, email workers@boston.gov.

Este aviso contiene información sobre sus derechos u obligaciones y debe traducirse de inmediato. Las traducciones son gratuitas. Para solicitar servicios de traducción, envíe un correo electrónico a workers@boston.gov.

Avi sa a genyen ladann enfòmasyon sou dwa w oswa obligasyon w, epi li ta dwe tradui imedyatman. Tradiksyon disponib san frè. Pou w mande sèvis tradiksyon, voye yon imèl nan workers@boston.gov.

本通知包含有關您的權利或義務的資訊，應立即翻譯。翻譯免費提供。要申請翻譯服務，請發送電子郵件至 workers@boston.gov。

Thông báo này có thông tin về các quyền và nghĩa vụ của quý vị, và cần được dịch thuật ngay lập tức. Bản dịch có sẵn miễn phí. Để yêu cầu dịch vụ dịch thuật, hãy gửi email tới workers@boston.gov.

Este aviso contém informações sobre seus direitos e deveres e deve ser traduzida imediatamente. As traduções estão disponíveis gratuitamente. Para solicitar serviços de tradução, mande um e-mail para workers@boston.gov.